



**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**  
**WARBIXIN SANNADEEDKA GARSOORKA JFS**



**“GARSOOR HANTA KALSOONIDA BULSHADA”**

**SHIR SANNADEEDKA**  
**GARSOORKA**  
**SOOMAALIYA 2022**

المؤتمر السنوي لمؤسسة القضاء الصومالي

**2021-2022**

1442-1443-H



TUSMO

<i>KALMADDA GUDDOOMIYAHA</i> .....	3
<b>CUTUBKA 1<sup>AAD</sup></b> .....	6
Horudhac.....	6
Hiigsiga Garsoorka .....	7
Yoolka Garsoorka .....	7
Qiyamka Garsoorka .....	7
Dastuurka & Garsoorka .....	7
Qaab-Dhismeedka Maxkamaddaha Dalka.....	8
Awoodaha Maxkamadda .....	8
Dastuurka Jfs & Xxigq .....	9
Waajibaadka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka.....	10
<b>CUTUBKA 2AAD</b> .....	12
Dacwadaha Garsoorka Sanadka 2021.....	12
<b>Madaxa 1<sup>aad</sup>: Dacwadaha Maxkamaddaha 2021</b> .....	12
Dacwadaha Maxkamadda Sare Dalka: .....	12
Dacwadaha Maxkamadda Gobolka Banaadir:.....	13
Dacwadaha Maxkamadda Puntland.....	14
Dacwadaha Maxkamadda Jubbland.....	15
Dacwadaha Maxkamadda Galmudug .....	16
Dacwadaha Maxkamadda Koonfur Galbeed .....	16
Dacwadaha Maxkamadda Hirshabeele .....	17
<b>Madaxa 2<sup>aad</sup>: Dacwadaha Xafiis-Yada Xeer Ilaalinta 2021</b> .....	18
Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka: .....	18
Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Puntland: .....	19
Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Jubbland: .....	22
Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Galmudug:.....	23
Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Koofur Galbeed:.....	25
Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Hirshabeele: .....	25
<b>CUTUBKA 3<sup>AAD</sup></b> .....	27
<b>Horumarka Garsoorka Dalka Sanadkii 2021</b> .....	27
Horumarka Maxkamadda Sare Ee Dalka.....	27
Horumarka Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Banaadir .....	29
Horumarka Maxkamadda Darajada 1 <sup>aad</sup> Gobolka Banaadir .....	30
Horumarka Maxkamadda Puntland .....	31
Horumarka Maxkamadda Puntland .....	33
Horumarka Maxkamadda Galmudug .....	33
Horumarka Maxkamadda Koofur Galbeed.....	34
Wax-Qabadka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka.....	35

## KALMADDA GUDDOOMIYAHA



Bismillaah, Mahadnaq Eebbe iyo bogaadin kaddib, waxaa sharaf weyn u ah bahda Garsoorka Dalka in sannadkii afaraad oo xidhiidh ah uu inoo qabsoomo Shirsannadeedka Garsoorku, isla markaana aynu soo saarno warbixin Sannadeedka Garsoorka Dalka. Shir-Sannadeedka Garsoorku waa madal ay hay'adaha Garsoorku isku qiimeeyaan dibna ugu eegaan hawlihii u qabsoomay hortebintan u lehsannadkan bilowga ah.

Bahda Garsoorka Soomaaliyeed waxa ay sannadkii dhammaaday ku hawlanaayeen u hirgelinta shaciga si midaysan iyadoo si weyn awoodda loo saaray in la mideeyo fahamka sharciga. Hal-ku-dhegga sannadkii tegay waxa uu curiyay in lasmeeyo madal dood-wadaag ah oo ay Garsooreyaashu ku gorfeeyaan arrimaha culayska leh ee u baahan in faham midaysan laga qaato sida heshiisyada laga galo dacwadaha ciqaabta ah, habraaca dacwadaha fulinta, danaha madaniga ah ee dacwadaha ciqaabta ah, kaalinta garsoorka ee ladagaalanka musuqa, dammaanad kusii deynta iyo mawduucyo kale oo miisaan ku leh hawl maalmeedka Garsoorka. Sidoo kale, waxa xoogga la saaray tayeynta iyo ku tababarka Booliiska qawaaniinta dalka si ay si sahlan ugu fuliyaan awaamiirta Garsoorka.

Sannadka dhammaaday ee 2021 waxa ay madaxda Garsoorku dedaal dheer ku bixiyeen sidii kor loogu qaadi lahaa loona tayayn lahaa nidaamka elektaroonigga ah ee maamulka dacwadaha kaas oo aanu rajaynyano in uu ka hirgali doono laguna fidin doono dhammaan Garsoorka heer Dowlad Goboleed sannadkan bilowga ah Idamka Alle. Waxaan sidoo kale rajaynaynaa in sannadkan bilowga ah la helo nidaamka maamulka dacwadaha oo xidhiidhsan kana soo bilaaban doona saldhigyada booliska iyo laanta dembi baadhista, kuna soo xidhi doona Xafiisyada Xeer Ilaalinta, Maxkamadaha iyo Xabsiyada. Nidaamkaasi waxa uu sahli doonaa dhaqaajinta gal-dacwadeedka si fudud oo aan habsan lahayn, isla markaana waxa uu meesha ka saari doonaa warqadihii lumi jiray ama ku waxyeelloobi jiray inta ay u kala gudbayaan gacmaha kala duwan.

Sannadkan bilowga ah ee 2022, Garsoorku waxa uu higsanayaa in uu kaga dhabeeyo hal-ku-dhegga sannadkan ee ah “Garsoor Hanta Kalsoonida Bulshada” annaga oo xaqiijinayna in la laban-laabo dedaallada hore u socday ee lagu fududaynayo in sifudud loo heli karo adeegyada Maxkamadaha, dacwadahana looga furan karo, isla markaana si fudud Xafiisyada Xeer Ilaalinta loo geysan karo cabashooyinka. Waxaa sidoo kale dib u habayn lagu samayn doonaa habraacyada Maxkamadaha dhexdooda si meesha looga saaro dib-udhaca dacwadaha kuyimaadda ee aan lagu khasbanayn. Hufnaanta iyo u hogaansanaanta sharciga ee garsoorka dhexdiisa ayaa iyagana xoogga lasaari doonaa iyada oo dib loo hawl-gelin doono kaabayaashii suurta gelin lahaa yoolalkan.

Garsoorka Soomaaliya waxa uu sii wadi doonaa hirgelinta Mac-hadka Tababarka Garsoorka oo unkiddiisu soo bilaabatay sannadkii 2020. Mac-hadka Tababarka Garsoorka oo sidoo kale noqon doona xarunta cilmi baadhista iyo tayaynta guud ahaan hawl-wadeenada garsoorka, waxa uu kamid noqon doonaa kaabayaasha uu Garsoorku u adeegsan doono hirgelinta yoolalka u qorshaysan sannadkan bilowga ah ee 2022 iyo sannadaha ka dambeeye haddii Alle yidhaahdo.

Ugu dambayntii, waxa aan u mahadcelinayaa dhamaan bahwadaagta Garsoorka ee marwalba nala garab taagan taageero farsamo iyo mid dhaqaale sidii ay hay’adaha Garsoorku ugu gudan lahaayeen waajibaadkooda si buuxda oo aan turxaan lahayn. Waxaan si gaar ah ugu mahadcelinayaa cid kasta oo gacan ka geysatay shaqooyinkii qabsoomay sannadkii dhammaaday ee 2021.

**Alle Ayaa Mahad Iska Leh**

**Baashe Yuusuf Axmed**

**Gudoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka**

## CUTUBKA 1<sup>aad</sup>

- Hordhac
- Hiigsiga Garsoorka
- Yoolka Garsoorka
- Qiyamka Garsoorka
- Dastuurka & Garsoorka
- Qaab-Dhismeedka Maxkamaddaha Dalka
- Awoodaha Maxkamaddaha
- Dastuurka J.F.S Iyo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka
- Waajibaadka Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka

CUTUBKA 1<sup>aad</sup>

## HORUDHAC

Garsoorku waa tiir ka mid ah tiirarka seddexda ah ee ay ku taagan tahay Dawladdnimadu waxa uuna taagan yahay xaqiijinta sarreeynta sharciga, dhowrista is ku xukunka iyo dhaqan galinta Xeerka, ilaalinta xuquuqda asaasiga ah ee muwaadinka, isku dheelitirka hay'adaha dawladda sida fulinta iyo sharci dajinta, go'aan ka gaadhista is haysadka bulshada dhexdeeda ah, ciqaabidda, anshaxmarinta cid kasta ee ku kacda fal uu sharcigu u aqoonsan yahay dambi iyo xaqsiinta qof kasta oo la kulma xad gudub ka dhan ah sharciga.

Warbixin sanadeedka Garsoorka -oo ay diyaariyeen Guddi farsamo oo uu magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare -waa soo bandhigidda xogta adeegyada cadaaladeed, guulaha la gaaray iyo caqabadaha soo wajahay Garsoorka Dalka marka laga reebo gobollada Somaliland. Bandhiggan ujeedkiisu waa in hal meel laga helo xogtaasi, ayna la socoto bulshadu guulaha iyo caqabdhaha Garsoorka Dalka, sidoo kale in ay noqoto kayd taariikheed oo u yaalla ummadda Soomaaliyeed.

Soo saaridda Buuggani oo ku aaddan Shir-Sanadeedka Garsoorka oo dhaca bilowga sanad kasta taariikhda miilaaddiga. Maadaama Shirkan uu qabsoomayo sannadkii Afaraad tan iyo markii dib loo ambaqaaday 2019 warbixintani waxa ay soo koobaysaa nuxurka xogtii sanadihii: 2018, 2019 iyo 2020, 2021 Waxa ayna ka kooban tahay warbixintu: Kalmadda Guddoomiyaha, Hordhac, iyo Sadex qeybood oo kala ah: Qeybta 1aad dib u milicsiga taxanaha Shir-sanadeedka Garsoorka ka dib ambaqaadkiisii. Qeybta 2aad Dacwadaha Garsoorka sanadka 2021-kii taas oo isugu jirta dacwadaha Maxkamaduhu ka garnaqeen iyo cabashooyinka iyo Gun gaarrada Xafiis-yada Xeer-Ilaalinta. Qeybta 3aad ayaa ah horumarka Hay'adda Garsoorka ee sanadka 2021 taas oo isugu jirta horumarka iyo hawlqabadka Maxkamadaha iyo kan Xafiiska Xeer-Ilaalinta.

Guud ahaan dacwadaha Garsoorka sanadka 2021 oo ka tarjumaya adeegga cadaaladeed ee Garsoorka qeybihiisa kale duwan -asaga oo gudanaya waajibaadkiisa ku xusan Baabka 9aad ee Dastuurka KMG iyo sharciyada kale ee dalka- waxa ay gaarayaan 14,727 dacwo oo ay qabteen Maxkamaduhu iyo 7,699 dacwo oo ay qabteen Xeer-Ilaalinta, wadarta guud waxa ay noqonaysaa 22,426 Dacwo oo isugu jira noocyada kala duwan ee dacwadaha.

## HIIGSIGA GARSOORKA

Hiigsiga garsoorka Soomaaliya, waa xaqijinta sareeynta sharciga iyo dhisidda hey'ado garsoor oo madax banana, hufan bixinna kara cadaalad loo simanyahay.

## YOOLKA GARSOORKA

Yoolka Garsoorka Soomaaliya waa in uu ku suntanaado Garsoor hufan oo bixin kara cadaalad loo siman yahay. Garsoorku waxa uu ku sifoobayaa sinnaan, daacadnimo, tayo adeeg-bixin, xaqijinta sareeynta sharcigaiyo ixtiraamka xuquuqda aadanaha aasaasiga ah ee dadkeena. . Garsoorku wuxuu dhiiri gelinayaa Xeer-dhaqameedka suuban ee Soomaaliyeed, waxaa uuna sidoo kale ilaalinayaa Dastuurka.

## QIYAMKA GARSOORKA

Garsoorka, waxaa asaas u ah qiyamka soo socda:

1. Madax banaani.
2. Karti Xirfadeed.
3. Daacadnimo.
4. Dhex-dhexaadnimo.
5. Hufnaan & Isla-xisaabtan.
6. Daah-furnaan.
7. Dhowrista Sarraynta Sharciga.

## DASTUURKA & GARSOORKA

Sida ku cad qodobka 106 DKMG Garsoorku waxa uu ka madax banaan yahay laamaha Dawladda ee sharci-dejinta iyo fulinta marka ay gudanayaan xilkooda. Wuxuu si kooban Dastuurku ugu qeexay qodobka 108 qaab dhismeedka Garsoorka oo ku saleysan habka Fedaraalka kaas oo u baahan in si xigmadeysan loo darso go'aanna looga gaaro hannaanka cadaaladeed (Justice Model) ee la qaadanayo. Wuxuu sidoo kale Dastuurku ka hadlaa dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka oo u xilsaaran socodsiinta hawlaha Garsoorka sida magacaabida, anshaxmarinta Garsoorayaasha iyo jaangoynta mushaarka iyo gunnada hawlgabka. Dastuurku waxa uu sidoo kale ka hadlaa dhawrista xuquuqda muwaadinka, habka dacwadda loogu soo oogayo iyo habka dhegeysiga dacwadda.

## QAAB-DHISMEEDKA MAXKAMADDAHA DALKA

Dasduurkii 1979 ayaa tilmaamaya qaab-dhismeedka Garsoorka waxaan qeexaya Qodobka 100aad. Dastuurka waxa uu dhisayaa Maxkamadaha soo socda:

1. Maxkamada Sare.
2. Maxkamadaha Racfaanka.
3. Maxkamadaha Gobollada.
4. Maxkamadaha Dagmooyinka.
5. Guddiyada garsoorka ee goobaha shaqada.
6. Maxkamadaha Ciidanka.

Waxa iyana u baahan in hoos loo eego Dastuurkii la hirgaliyay 2012 Qodobka 108 kaasoo qaab-dhismeedka Maxkamadaha ka dhigay seddex heer oo kala aha:

1. Maxkamada Dastuuriga ah
2. Maxkamadaha heer Federaal
3. Maxkamadaha Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya.

## AWOODAHA MAXKAMADDA

- Maxkamadaha Heer Federaal ayaa leh awoodaha qaadidda Dacwadaha federaaliga ah. Dacwad kasta oo Federaali ah haddii la hor keeno Maxkamad aan ahayn Maxkamadaha heer Federaal, dacwadaas waa in loo wareejiyaa Maxkamadaha heer Federaal. (Qodobka 109 farqada 1aad)
- Maxkamada Dastuuriga ayaa leh awoodaha dacwadaha Dastuuriga ah. (Qodobka 109 farqada 2aad)
- Maxkamadda Dastuurka ayaa ah Garsooraha kama danbeysta ah ee arrimaha dastuurka. (Qodobka 109 farqada b)
- Baarlamaanka Dawladda Federaalku wuxuu ka soo saarayaa sharci lagu faahfaahinayo sida ay isula falgalayaan Maxkamadaha heer Federaal iyo Maxkamadaha Dawladaha Xubanaha ka ah Federaalka. (Qodobka 109 farqada 3aad).
- Maxkamadda Dastuurka keliya ayaa leh awoodda Garsoor ee qeexidda arrimaha Dastuurka ee aan ka iman dacwad maxkamadeed.

- Maxkamad walba oo awood Garsoor lihi waxa ay go'aamin kartaa in arrini la hor keenay ay tahay mid Dastuuri ah iyo in kale, mar haddii aanay ka hor imanayn awoodaha gaarka ah ee Maxkamadda Dastuurka sida kuxusan Qodobka 109C ee Dastuurka. (Qodobka 109 farqada a).
- Shakhsi ,koox iyo dawladba si toos ah ayey ugu gudbin karaan Maxkamadda Dastuurka codsi tixraac ah oo la xiriira arrimaha khuseeya danaha dadweynaha. (Qodobka 109 farqada d).

#### **DASTUURKA JFS & XXIGQ**

- Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya wuxuu si Garsoorka ka madax bannaan u asaasayaa Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka oo ay ku jirto shaqada dambi soo oogista sida uu qabo Qod. 114 D.F.S, oo dhigaya:-
- Waxaa jira Hey'ado madaxbanaan oo ay yeelanayaan Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, sida Xeer-Ilaaliyaha Guud, Hanti-dhowrka guud, iyo Bangiga Dhexe oo noqonaya Heer Federaal ah.
- Sidoo kale, qaab-dhismeedka nidaamka Federaal ee Soomaaliya, oo isna dib u eegis lagu wado, ayaa isna saammayn ku yeelan kara kaalinta Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.
- Waxaa kale oo Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu si cad u sheegayaa in Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka uu ka mid yahay Golaha Adeegga Garsoorka sid ku cad Qod. 109 D.k.S F. 2

### WAAJIBAADKA XAFIISKA XEER ILAALIYAHA GUUD EE QARANKA

- Waajibaadka Xafiiska xeer-ilaalyaha guud waxaa ka mid ah oogista dacwad ciqaabedka. Wuxuu diyaariyaa dacwooyinka la xiriira faldembiyeedyada, wuxuu ka qeybgala dhageysiga dacwadaha Ciqaabta iyo Madaniga.
- Markasta oo ay ku jirto danta guud, wuxuu dhaqaajiyaa dacwaddaha Madaniga dan guud awgeed, waxa uu xaq u leeyahay inuu rafcaan ka qaato dacwaddaha madaniga iyo kuwa ciqaabta Sida uu sharcigu tilmaamaayo sida ku cad Qod. 8 F 1 xafaha A, B iyo C, ee X.N.G.
- Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranku waxa uu ku haggaa kuna kormeeraan hay'adaha booliska howlaha la xiriira baarista dembiyada kala duwan, sidoo kale Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud waxa uu si weyn u ilaaliyaa xaaladda xabsiyada iyo dhismayaasha kale ee wax lagu xiro, sida uu tilmaamaayo Xeerka Nidaamka Xabsiyada sida uu dhigayo Qod. 8aad F 2 ee X.N.G.
- Sida ku cad Qod. 12 aad F 2 ee Xeerka Habka Ciqaabta soomaaliyeed, waajibaadka Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxaa kaloo ka mid ah in marka kasta oo lama huraan loo arko, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxa uu marxalad kasta amri karaa in xafiiskiisu la wareego baaritaanka dacwadda iyo oogisteedaba, sida uu qabo Qod. 12 aad F 5 ee X.H.C

## CUTUBKA 2<sup>aad</sup>

- Dacwadaha Garsoorka Dalka 2021
- Madaxa 1<sup>aad</sup> : Dacwadaha Maxkamaddaha
  - Dacwadaha Maxkamadda Sare Ee Dalka
  - Dacwadaha Maxkamada Gobolka Banaadir
  - Dacwadaha Maxkamadda Puntland
  - Dacwadaha Maxkamadda Jubbland
  - Dacwadaha Maxkamadda Galmudug
  - Dacwadaha Maxkamadda Koonfur Galbeed
  - Dacwadaha Maxkamadda Hirshabeele
- Madaxa 2<sup>aad</sup> : Dacwadaha Xafiis-yada Xeer ilaalinta
  - Dacwadaha Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka
  - Dacwadaha Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Gobolka Banaadir
  - Dacwadaha Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Puntland
  - Dacwadaha Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Jubbland
  - Dacwadaha Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Galmudug
  - Dacwadaha Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Koonfur Galbeed
  - Dacwadaha Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Hirshabeele

## CUTUBKA 2aad

## Dacwadaha Garsoorka Sanadka 2021

Madaxa 1<sup>aad</sup>: Dacwadaha Maxkamaddaha 2021

## Dacwadaha Maxkamadda Sare Dalka:

Maxkamadda Sare ee JFS oo ah Maxkamadda ugu sarreysa dalka, waxaa xarun u ah Caasimadda dalka ee Muqdisho, guud ahaan dacwadaha ay qabatay sanadka 2021 waa 198, dacwadahaas oo isugu jira: Madani 102, Ciqaab 27, Dib u eegis 46 Maamul 22 iyo Shaqaale 1.

**Shaxda Dacwadaha Maxkamadda Sare Ee JFS**

Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha Furmay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	102	60	42
2	Ciqaab	27	14	13
3	Dib u eegis	46	41	5
4	Maamul	22	17	5
5	Shaqaalaha	1	1	0
<b>Wadarta Guud</b>		<b>198</b>		

**Dacwadaha Maxkamadda Gobolka Banaadir:**

Maxkamadaha Gobolka Banaadir waxa ay ka kooban yihiin labo darajo oo kala ah: Maxkamadaha Derajada 1aad oo isugu jira gobol iyo degmo, iyo Maxkamadda derajada 2aad oo ah Maxkamadda Rafcaanka. Guud ahaan dacwadaha ay qabteen Maxkamadaha Derajada 1aad sanadka 2021 waa 2,494. Maxkamadda Derajada 1aad ee Gobolka Banaadir waa 1,369, dacwadahaas oo isugu jira: Madani 337 iyo Ciqaab 1,032. Sidoo kale Maxkamadaha Derajada 1aad ee Degmooyinka Gobolka Banaadir waa 1,125, Dacwadahaas oo isugu jira: Madani 875 iyo Ciqaab 250. Halka Maxkamadda Derajada 2aad ee Rafcaanka ay qabatay 193, dacwadahaas oo isugu jira: Madani 116 iyo Ciqaab 77.

**Shaxda Dacwadaha Maxkamadda Gobolka Banaadir**

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	337	125	212
2	Ciqaab	1,032	813	219
<b>Wadarta Guud</b>		<b>1,369</b>		
MAXKAMADHA DEGMOOYINKA GOBOLKA BANAADIR				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la Furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	875	711	164
2	Ciqaab	250	237	13
<b>Wadarta Guud</b>		<b>1,125</b>		
MAXKAMADDA RAFCAANKA GOBOLKA BANAADIR				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	116	75	41
2	Ciqaab	77	25	52
<b>Wadarta Guud</b>		<b>193</b>		

### Dacwadaha Maxkamadda Puntland

Maxkamadaha Puntland ee derajada 1aad iyo Rafcaanka waxa ay fadhiyo ku leeyihiin xarumaha dhammaan Gobolada Puntland, halka Maxkamadda Sare oo fadhigeedu yahay caasimadda Puntland ee Garoowe.

Guud ahaan Maxkamadaha Puntland oo ka kooban Maxkamadda Sare, Maxkamadaha Rafcaanka Gobolada iyo Makamadaha derajada 1aad waxaa sanadka 2021 soo gaaray dacwado tiradoodu tahay 6,133 ku waas oo isugu jira: Madani 4,056, Ciqaab 2,069, Maamul 5 iyo dib-u-eegis 6. Oo marka la faahfaahiyo sidan ah:

#### Shaxda Dacwadaha Maxkamadda Puntland

S/N	Maxkamadda	Madani	Ciqaab	Wdarta Guud
1	Maxkamadda D1aad ee G.Nugaal	451	301	752
	Maxkamadda Rafcaanka G.Nugaal	185	115	300
2	Maxkamadda D1aad ee G. Karkaar	121	202	323
	Maxkamadda Rafcaan G. Karkaar	14	30	44
3	Maxkamadda D1aad ee G. Bari	1421	419	1840
	Maxkamadda Rafcaanka G. Bari	23	35	58
4	Maxkamadda D1aad ee G.Mudug	795	400	1195
	Maxkamadda Rafcaanka G. Mudug	70	155	225
5	Maxkamadda D1aad ee G.Hayland.	18	19	37
	Maxkamadda Rafcaanka G.Hayland	6	1	7
6	Maxkamadda D1aad ee G. Sanaag	418	225	643
	Maxkamadda Rafcaanka Sanaag	42	61	103
7	Maxkamadda D1aad ee G.Cayn	83	17	100
	Maxkamadda Rafcaanka G.Cayn	22	10	32
8	Maxkamadda D1aad ee G.Gardafuu	80	25	105
	Maxkamadda Rafcaanka Gardafuu	22	15	37
9	Maxkamadda D1aad ee G.Sool	220	9	229
	Maxkamadda Rafcaanka Sool	23	0	23
10			Wadarta	6053

MAXKAMADDA SARE EE PUNTLAND				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	39	39	0
2	Ciqaab	30	20	10
3	Maamul	5	5	0
4	Dib u eegis	6	5	1
Wadarta Guud			80	

### Dacwadaha Maxkamadda Jubland

Guud ahaan Maxkamadaha Jubbaland oo ka kooban Maxkamadda Sare, Maxkamadaha Rafcaanka Gobolada iyo Makamadaha derajada 1aad waxaa sanadka 2021 soo gaaray dacwado tiradoodu tahay 846 ku waas oo isugu jira: Madani 640, Ciqaab 204 iyo shaqaale 2.

### Shaxda Dacwadaha Maxkamadda Jubland

MAXKAMADDAHA DERAJADA 1 <sup>AAD</sup> EE JUBBALAND				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	582	536	48
2	Ciqaab	172	144	28
Wadarta Guud			756	
MAXKAMADDAHA DERAJADA 2 <sup>AAD</sup> EE JUBBALAND				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	55	43	12
2	Ciqaab	32	26	6
Wadarta Guud			87	
MAXKAMADDA SARRE EE JUBBALAND				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	3	3	0
Wadarta Guud			3	

### Dacwadaha Maxkamadda Galmudug

Guud ahaan Maxkamadaha Galmudug oo ka kooban Maxkamadda Sare, Maxkamadaha Rafcaanka Gobolada iyo Makamadaha derajada 1aad waxaa sanadka 2021 soo gaaray dacwado tiradoodu tahay 833 ku waas oo isugu jira: Madani 621, shaqaale 1 iyo Ciqaab 211.

#### **Shaxda Dacwadaha Maxkamadda Jubland**

MAXKAMADAHA DERAJADA 1 <sup>AAD</sup> EE GALMUDUG				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	564	499	64
2	Ciqaab	211	187	24
Wadarta Guud			775	
MAXKAMADDAHA DARAJADA 2 <sup>AAD</sup> EE GALMUDUG				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	50	28	22
2	Ciqaab	0	0	0
Wadarta Guud			50	
MAXKAMADDA SARRE EE GALMUDUG				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	8	5	3
Wadarta Guud			8	

### Dacwadaha Maxkamadda Koonfur Galbeed

Guud ahaan Maxkamadaha Koonfur Galbeed oo ka kooban Maxkamadda Sare, Maxkamadaha Rafcaanka Gobolada iyo Makamadaha derajada 1aad waxaa sanadka 2021 soo gaaray dacwado tiradoodu tahay 1,682 ku waas oo isugu jira: Madani 1,249, Ciqaab 430 iyo dib-u-egis.

**Shaxda Dacwadaha Maxkamadda Jubland**

<b>MAXKAMADDAHA DERAJADA 1AAD EE KOOFUR-GALBEED</b>				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	1,187	1,002	185
2	Ciqaab	374	307	67
<b>Wadarta Guud</b>			<b>1,561</b>	
<b>MAXKAMADDAHA DERAJADA 2AAD EE KOOFUR- GALBEED</b>				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	42	22	20
2	Ciqaab	51	45	6
<b>Wadarta Guud</b>			<b>93</b>	
<b>MAXKAMADDA SARRE EE KOOFUR-GALBEED</b>				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	20	18	2
2	Ciqaab	5	5	0
3	Dib u eegis	3	2	1
<b>Wadarta Guud</b>			<b>28</b>	

**Dacwadaha Maxkamadda Hirshabeele**

Guud ahaan Maxkamadaha Hirshabeelle oo ka kooban Maxkamadaha Rafcaanka Gobolada iyo Makamadaha derajada 1aad waxaa sanadka 2021 soo gaaray dacwado tiradoodu tahay 2,345 ku waas oo isugu jira: Madani 2,094, Shaqaale 2 iyo Ciqaab 249.

**Shaxda Dacwadaha Maxkamadda Jubland**

<b>MAXKAMADDAHA DERAJADA 1<sup>AAD</sup> EE HIRSHABELE</b>				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	2,020	1,559	459
2	Ciqaab	237	175	62
<b>Wadarta Guud</b>			<b>2,257</b>	
<b>MAXKAMADDAHA DERAJADA 2<sup>AAD</sup> EE HIRSHABELE</b>				
Tirsi	Nooca Dacwadda	Dacwadaha la furay	Dacwadaha Dhamaaday	Dacwadaha Socda
1	Madani	76	64	12
2	Ciqaab	10	8	2
<b>Wadarta Guud</b>			<b>88</b>	


**Madaxa 2<sup>aad</sup>: Dacwadaha Xafiis-yada Xeer ilaalinta 2021**

**Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka:**


Guud ahaan Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxa uu qabtay sanadka 2021 waa 1,729 dacwo, ku waas oo isugu jira: Gungaar 672, Cabasho 532 iyo Taar 1,197.

**Shaxda Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka**

Tirakoobka Kiisaska sannadka 2021													
	Janaayo	Febaraayo	Maarso	Abril	Meey	Juun	Juulaay	Agoosto	Sebteember	Oktoobar	Nofembar	Disceembar	W. guud
<b>Taarka</b>	101	98	95	93	117	124	152	147	130	140			<b>1,197</b>
<b>Cabasho</b>	81	44	46	55	48	65	38	63	50	42			<b>532</b>
<b>WADARTA GUUD</b>												<b>1,729</b>	
<b>Tirada Taararka Gungaarkooda la Keenay lana Horkeeyay Maxkamadaha Awooda u leh</b>													
<b>Gungaar</b>	63	56	54	63	58	75	77	94	64	68			<b>672</b>



## BUUGGA SANADKA GARSOORKA 2021




### Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Puntland:

Guud ahaan Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Puntland waxa uu qabtay sanadka 2021-kii 4,954 dacwo, ku waas oo isugu jira: Gungaar 2,255, Cabasho 2,699.


### Shaxda Dacwadaha Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud Ee Puntland

Tirakoobka Kiisaska sannadka 2021													
	Janaayo	Febaraayo	Maarso	April	May	Juun	July	Agoosto	Sebteember	Oktoobar	Novveember	diseember	W. guud
<b>Gungaar</b>	235	150	225	125	229	200	100	285	250	145	311		<b>2,255</b>
<b>Cabasho</b>	200	195	122	225	215	400	300	314	415	105	208		<b>2,699</b>
<b>WADARTA GUUD</b>													<b>4,954</b>


Boqolay Ahaan 13 Kiis Ee Ugu Badan, 2021.




Dembiyada ka dhacay Gobolada Puntland sanadka, 2021.



Baqolay ahaan qashaaraha ay sababeen shilalka gaadiidka 2021.



Shilalka ka dhacay gobolada Puntland sanadka 2021.




**Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Jubland:**


Guud ahaan Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Jubbaland waxa uu qabtay sanadka 2021 waa 531 dacwo, ku waas oo isugu jira: Gungaar 204, cabasho 166 iyo Taar 365.

**Shaxda Dacwadaha Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud Ee Jubland**

Tirakoobka Kiisaska sannadka 2021													
	Janaayo	Febraayo	Maarso	April	May	Juun	Julay	Agoosto	Sebteember	Oktoobar	Novveember	diseember	W. guud
<b>Taarka</b>	46	34	23	25	38	34	28	32	42	25	38		<b>365</b>
<b>Cabasho</b>	21	18	12	16	11	13	9	7	17	23	19		<b>166</b>
<b>WADARTA GUUD</b>													<b>531</b>
Tirade Taararka Gungaarkooda la Keenay lana Horkeeyay Maxkamadaha Awooda u leh													
<b>Gungaar</b>	25	24	16	17	19	17	18	15	19	18	16		<b>204</b>



### Muuqaalka Boqoleyda 2021 ee Xeer-illaalinta Jubaland




#### Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Galmudug:

Guud ahaan Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Galmudug waxa uu qabtay sanadka 2021 waa 211 dacwo, ku waas oo isugu jira: Gungaar 116, cabasho 95.


#### Shaxda Dacwadaha Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud Ee Galmudug

TIRAKOOBKA KIISASKA SANNADKA 2021													
	Janaayo	Febaraayo	Maarso	April	May	Juun	July	Agoosto	Sebteember	Oktoobar	Noveember	diseember	W. guud
<b>Gungaar</b>	24	8	5	9	7	4	16	8	6	8	21		<b>116</b>
<b>Cabasho</b>	11	6	4	7	14	9	4	12	8	8	12		<b>95</b>
<b>WADARTA GUUD</b>													<b>211</b>

### TIRAKOOBKA 2021



### 10 ka kiis ee ugu badan xafiis xeer ilaaliyah sanadka 2021



**Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Koofur Galbeed:**

Guud ahaan Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Koonfur Galbeed waxa uu qabtay sanadka 2021 waa 371 dacwo, ku waas oo isugu jira: Gungaar 295, cabasho 76.

**Shaxda Dacwadaha Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud Ee Koofur Galbeed**

<b>Tirakoobka Kiisaska sannadka 2021</b>													
	<b>Janaayo</b>	<b>Febaraayo</b>	<b>Maarso</b>	<b>April</b>	<b>May</b>	<b>Juun</b>	<b>Julay</b>	<b>Agoosto</b>	<b>Sebteember</b>	<b>Oktoobar</b>	<b>Novveember</b>	<b>diseember</b>	<b>W. guud</b>
<b>Gungaar</b>	31	22	30	34	26	19	24	30	21	23	26	9	<b>295</b>
<b>Cabasho</b>	5	8	7	9	10	6	5	8	5	7	4	2	<b>76</b>
<b>WADARTA GUUD</b>													<b>371</b>

**Dacwadaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Ee Hirshabeele:**

Guud ahaan Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Hirshabeelle waxa uu qabtay sanadka 2021 waa 274 dacwo, ku waas oo isugu jira: Gungaar 189, Cabasho 85.

**Shaxda Dacwadaha Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud Ee Hirshabeele**

<b>Tirakoobka Kiisaska sannadka 2021</b>													
	<b>Janaayo</b>	<b>Febaraayo</b>	<b>Maarso</b>	<b>April</b>	<b>May</b>	<b>Juun</b>	<b>Julay</b>	<b>Agoosto</b>	<b>Sebteember</b>	<b>Oktoobar</b>	<b>Novveember</b>	<b>diseember</b>	<b>W. guud</b>
<b>Gungaar</b>	10	7	13	30	15	20	23	17	11	13	30		<b>189</b>
<b>Cabasho</b>	0	2	10	8	7	9	18	7	12	10	2		<b>85</b>
<b>WADARTA GUUD</b>													<b>274</b>

## CUTUBKA 3<sup>aad</sup>

- Horumarka Maxkamadda Sare Ee Dalka
- Horumarka Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Banaadir
- Horumarka Maxkamadda Darajada 1<sup>aad</sup> Gobolka Banaadir
- Horumarka Maxkamadda Puntland
- Horumarka Maxkamadda Jubblanad
- Horumarka Maxkamadda Galmudug
- Horumarka Maxkamadda Koofur Galbeed
- Wax-Qabadka Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud Ee Qaranka.

## HORUMARKA GARSOORKA DALKA SANADKII 2021

**Horumarka Maxkamadda Sare Ee Dalka**

Ayada oo ka duuleysa Sare u qaadida adeegga bulshada waxa ay ku guuleysatay Sanadka 2021 howlaha hoose:

- **Nidaamka Maamulka Dacwadaha (Electronic Case Management System)**

Labadii sanno ee 2020 iyo 2021 waxa ay ku guulaysatay in ay hirgeliyo nidaamka casriga ah ee maamulka dacwadaha Maxkamadaha kaas oo ka hirgelay Maxkamadda Sare sannadka 2021, Nidaamkan waxa uu fududaynayaa qabashada adeegyada ay bixiso Maxkamadda sida: Tixraacidda xogta dacwadaha, Akhrinta Galalka ee Garsoorayaasha, kala nidaaminta muddaymaha dacwadaha, Kaydinta xogta dacwadaha iyo isla xisaabtanka guud ee Garsoorka dhexdiisa, Iyada oo nidaamkan ay Garsoorayaasha iyo Kaaliyaashu ku leeyihiin Account iyo raqam sireedyo midkasta u gaar ah oo ku galayo magaciisa, kadibna uu midkasta awood u yeelanayo;- in uu arko dacwadaha ku qoran, akhriyana dhammaan qoraallada ay soo gudbiyeen dhinacyadu, uuna Garsooruhu ku illaaliyo Kaaliyaha in uu soo galiyey dhammaan lifaaqyadii Galka dacwada accountka.

Sidoo kale Gudoomiyaha Maxkamadda waxa uu nidaamka dacwadaha ee casriga ah u sahlayaa in uu si fudud u sameeyo gal ku qoris, uuna la socdo dacwadaha muddo dhaafka ah, isla markaana ogaado haddii dacwadda habraacedii wax ka dhiman yihiin ama laga soo booday tallaabo muhiim ah.

Si guud, nidaamkani waxa uu hoggaanka Garsoorka gaar ahaan Maxkamada sare ka caawiyay in ay si fudud u helaan tirakoobka dacwadaha Maxkamadda Sare, celceliska muddada ay qaadatay in ay dacwaduhu ku dhamaadaan, noocyada dacwadaha iyo guud ahaan inta gal ee uu dhameeyay Garsoore kasta iyo muddada uu ku dhameeyay, Arrintaas oo taageeraysa isla xisaabtanka Garsoorka iyo aqoonsiga galdaloolooyinka jira si loo buuxiyo meelaha ay culaysyadu ka jiraan.

- **Tayaynta Garsooreyaasha, Kaaliyeyaasha iyo Hawl Wadeennada kale ee Garsoorka**

Waxa ay bilowday barnaamijyo lagu tayaynayo dhammaan hawl wadeennada kala duwan ee Garsoorka, kuwaas oo laga soo bilaabo 2019 illaa iyo hadda u soconaya si habsami leh sida tababarro xirfadeed oo la siiyey kaaliyeyaasha kuwaas oo lagu tababaray qorista maxdarka Maxkamadda, maamulka dacwadaha ee casriga ah (Electronic Case Management system), sidoo kale waxa ay tababarro ugu samaysay shaqada gudeheed (on job training) howl wadeenada

Garsoorka sida: xafiiska xasuus dhowr-ka, Gaarsiiyayaasha Maxkamadda Sare iyo xafiiska maamulka maaliyada, kuwaas oo kor u qaaday habsami u socodka dhinaca maamulka Maxkamadda sare iyo guud ahaan Garsoorka Dalka.

Intaa waxaa dheer in sanadkii 2021 la soo kordhiyey habka daba galka iyo korjoogtaynta dhammaan shaqaalaha Maxkamadda sare (Performance appraisal) kuwaas oo la jaanqaadi kara heerarka caalamiga ah ee dunida laga isticmaalo. Iyada oo lagula xisaabtami doono laguna abaalmarin doona shaqaalaha waxqabadkooda si sanadle ah.

▪ **La dagaallanka Musuqa ee Garsoorka Dhexdiisa**

labadii sannadood ee ugu dambaysay Madaxda Garsoorka oo uu hormuud u yahay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare waxa ay dagaal xooggan ku qaadeen la dagaalanka musuqa, laaluushka iyo eexda iyada oo loo marayo habraacyada sharcigu ogol yahay iyo baadhis Garsoorka dhexdiisa ah, Si loo ilaaliyo xuquuda hawl-wadeennada Garsoorka loona xaqiijiyo ladagaalanka musuqa, waxaa baadhitaanno qoto dheer lagu sameeyaa dhammaan cabashooyinka dadweynaha iyo eedaymaha ay soo jeediyaan iyadoo la ilaalinayo amaanka cidda cabashada iyo cadaymaha keenta.

▪ **Shaqaalaysiinta howl wadeenada Maamulka Maxkamadda Sare**

Waxa Maxkamadda sare u suura gashay sanadkii la soo dhaafay ee 2021 in la shaqaalaysiiyo hawl wadeenno maamul oo ku hawlan shaqooyinka horumarinta Garsoorka, xidhiidhka bulshada iyo casriyaynta nidaamyada Garsoorku isticmaalo sida nidaamka electronic-ga ah ee dacwadaha kuwaas oo wax weyn ka bedelay hawl socodsiinta Dacwadaha gaar ahaan nidaamka dacwadaha ee Electronic-ga ah iyo howlaha maamul ee Maxkamadda sare.

Waxa kale oo sanadkii la soo dhaafay isku bedel iyo isku shaandhayn lagu sameeyey hormuudka waaxyaha ay ka kooban tahay Maxkamadda sare si loo dardar galiyo howlaha Garsoorka, korna loogu qaado tayada adeegga ay bixiso Maxkamaddu.

▪ **Machadka Tababarka Garsoorka**

labadii sannadood ee ugu dambeeyey waxa ay gadhwadeen ka ahayd aasaasidda iyo hirgelinta machad tababar oo ka jawaaba baahida xirfadeed ee Garsooreyaasha, xeer ilaaliye-yaasha iyo dhammaan hawl wadeennada kale ee Garsoorka.

Machadkan oo hadda dhidibadiisu taagan yihiin waxaa la dhamaystiray axdigii lagu aasaasay, qaab dhismeedkii, shaqaalaysiinta hawl wadeennadiisii, dejinta manhajka Machadka iyo diyaarinta macalimiinta Machadka wax ka dhigi doona, iyada oo uu Machadka Tababarka Garsoorku tijaabadii koowaad ee tababarka Garsoorayaasha u sameeyey xubno katirsan Garsoorka Galmudug oo dhawaan la shaqaalaysiiyay, isaga oo maraya habraacyada loo dejiyay sida manhajka tababarka

ee machadka iyo macalimiin loo diyaariyay inay bixiyaan.

Dhawaan waxaa la hirgelin doonaa dhismaha xarunta guud ee machadku ku yeelan doono magaalada Muqdisho halkaas oo noqon doonta xarunta laga hago tababarrada iyo cilmi baadhista arrimaha Garsoorka.

Sidaa oo kale, waxa uu machadku dhawaan hirgelin doonaa in uu laamo ka furo dhammaan Caasimadaha Dowlad Xubnaha ka aha DFS ama xarumaha ay ku shaqeeyaan Maxkamadaha sare.

### **Horumarka Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Banaadir**

Sanadkii 2021 waxaa u suura gelay in la gaarsiiyo adeegyada Garsoorka oo la hirgeliyo Maxkamado degmo si lamid ah degmooyinka kale ee Gobolka Banaadir sidoo kale waxaa Dhismo, dayactir iyo qalabeynba lagu sameeyay Maxkamaddaha degmooyinka qaarkood Iyada oo laga duulayo baahiyaha aasaasiga ah ee ka jira Garsoorka G/Banaadir ayaa waxaa dib u habeyn maamul lagu sameeyay qaar ka mid ah Maamulka Maxkamadaha Degmooyinka G/Banaadir si loo dardargeliyo howlaha baaxadda leh ee horyaala isla markaana bulshada ku nool Gobalka Banaadir ay u helaan Garsoor ugu adeego si Hufan loona baahiyo Adeega Caddaaladda.

Sidaas oo kale waxa ay ku guuleysatay in la dhameystiro Garsoorka Gobalka Banaadir oo ay markii hore shaqeynayeen 14 Maxkamad degmo, waxaa lagu guuleystay in la dhameystiro 3-dii Degmo ee kale ayada oo la xaqiijinayo mabda' Dastuuri ah oo ah "Baahinta Adeegga Cadaaladdu in uu yahay waajib Qaran". Degmooyinka laga hirgeliyay Maxkamadahaas waxaa ka mid ah: Shibis, Kaxda iyo Degmada Boondheere, iyada oo dib u dhis iyo qalabeyn lagu sameeyay Maxkamadaha Degmooyinka Wadajir, Xamar- wayne, Shangaani, Howl-wadaag, Waaberi iyo Kaaraan, si lamida taas waxaa dib loo hawl galiyey burburki Dawladdii dhexe ka dib Xafiiska Diiwan gelinta Rahanta iyo Hantida Ma guurtada ee Maxkamadda Rafcaanka G/Banaadir.

**Horumarka Maxkamadda Darajada 1<sup>aad</sup> Gobolka Banaadir**

Sanadkan 2021 waxa ay wax ka qabatay iyada oo xaqiijinaysa isbedeladdii iyo shaqooyinkii soo socday sanadihii hore, arimahan soo socda:

1. Waxay ku guuleysatay sare u qaadidda iyo tayaynta xirfadda hawl-wadeennada ka shaqeeya MGB, iyada oo Guud ahaan Garsoorka G/Banaadir horumar ku tallaabsaday Saddexdii sano ee lasoo dhaafay, isbedelkaas oo tusaale u tahay in Shaqaalaha Garsoorka G/Banaadir kor looqaaday aqoontooda iyo xirfaddooda ayna qaarkood heleen tababarro.
2. Waxa ay Maxkamaddu tababar khuseeya Shaqada Booliska iyo ilaalinta Xuquuqul insaanka qaar ka mid ah saraakiisha Hey'adda Booliska, sida: Taliyeyaasha Qeybaha, Taliyeyaasha Saldhigyada Booliska iyo Baarayaasha ka howlgala Saldhigyada Booliska Degmooyinka, Qeybta Baarista Dambiyada iyo Qeybta Nabadgalyada Wadooyinka si kor loogu qaado xirfaddooda loona xaqiijiyo ilaalinta Xuquuqda eedeysanaha.
3. Dhanka Dacwadaha Madaniga Maxkamadda G/Banaadir, waxay sanadkan 2021 hirgalisay furista diiwaanka Dacwadda Gaaban, taas oo fududeysay in dadka ku dacwoonaya Xuquuqda ay u haysta Cadeymaha sida Heshiisyada iyo Qoraaladda sugan ee ku xusan Habraaca Qodobada. 272 ilaa 285 ee XHMS, taas oo ka fudud habraaca Dacwadaha caadigaa taas oo suura gilineysa in Bangiyada dalka ay ku dhiiradaan inay maal galin sameeyaan, waxaana sannadkaan Maxkamaddu furtay 12 Dacwad Gaaban ah, oo 8 ka mid ah gabagabeeyay lana fuliyay, ayna muwaadiniintii xuquuqdooda ka maqneyd heleen, taasoo ah guul weyn oo u qabsoontay Maxkamadda G/Banaadir.
4. Maxkamadda G/Banaadir, waxay dardar galisay qaybta Fulinta, iyadoo loo qalabeeyay Xafiis Gaar ah, waxaana tababaro ku saabsan hab-raaca Fulinta xukunnada u qabatay Taliye Qeybeedyada iyo taliyayaasha Saldhigyada Boliiska Gobolka Banaadir.
5. Maxkamaddu waxay ay iibisay gaari ay Maxkamaddu leedahay oo ka caawiya Garsoorayaasha booqashada hantida ma guurtada ah oo muranku ka taagan yahay oo uu dhulku ugu horreeyo, si loo hubiyo iswaafaq sanaanta dukumintiyada dhinacyada iyo buqacadda la isku haysto.

6. Gudoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir waxa uu safar aqoon kororsi (Study Tour) ah, ku tagay Machadka Tababarka Garsoorka Kenya, isagoo kulamo khibrad kororsi iyo aqoon isweydaarsi ah la yeeshay madaxda Garsoorka Dalka Kenya, kana Codsaday inay tababar u sameeyaan Shaqaalaha Maxkamadda G/Banaadir.
7. Maxkamadda G/Banaadir, waxay sanadkaan u fidisay tababar ardayda barta Kuliyaddaha Sharciga ee Jaamacadaha kala duwan ee dalka, si loo soo saaro arday ay sareyso xirfadooda iyo Fahamkooda Shuruucda iyo Hanaanka ay u shaqeeyaan Maxkamadaha, looguna dhiiri giliyo ardayda Soomaaliyeed barashada sharciga.

### Horumarka Maxkamadda Puntland

Golaha Garsoorku waa mid ka mid ah saddexda Gole ee Dowladda Puntland waxa uuna hoos yimaada Guddiga Sare ee Garsoorka oo ka kooban 7 xubnood. Garsoorka Puntland waxa uu shaqaynayey ilaa markii Puntland la aas'aasay sanadkii 1998-dii Puntland waa maamul-gobaleedka ugu da'da weyn taas oo u sahashay in adeegga Garsoorka ka shaqeeyo inta badan gobalada Puntland. Wuxuuna Garsoorka puntland u qeybsamaa labo Qeybood oo kala ah:

- **Maxkamadaha**
- **Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud**

Maxkamadaha waxa ay ka kooban yihiin Maxkamadda Sare iyo Maxkamadaha Rafcaanka ee 9-ka Gobol ee Puntland ka dhisan, waxaa kale oo jira Maxkamadaha derajada 1aad oo ka dhisan 29 Degmo.

Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud oo ka kooban Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo Ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo Xeer-Ilaaliyeyaasha 9-ka Gobol ee Puntland.

Wuxuuna ka howlgalaa dhammaan Gobolada Puntland iyo Degmooyin-kooda waxaana gobaladaas ka mid ah:

1. Gobolka Mudug: waxaa ka dhisan 5 Degmo “Gaalkacayo, Jirriiban, Galdogob, Saaxo iyo Xarfo”.
2. Gobolka Nugaal: waxaa ka dhisan 4 Degmo “Garoowe, Eyl, Burtinle iyo Dangorayo”.
3. Gobolka Cayn: waxaa ka dhisan 2 Degmo “Buuhoodle iyo Widhwidh”.
4. Gobolka Sool: waxaa ka dhisan 4 Degmo “Laascaanood, Taleex, Xudun, Boocame”.
5. Gobolka Karkaar: waxaa ka dhisan 4 Degmo “Qardho, Bayla, Waaciya iyo Dhudhub”.

6. Gobolka Bari: waxaa ka dhisan 3 Degmo “Boosaaso, Qandala iyo Carmo”.
7. Gobolka Sanaag: waxaa ka dhisan 2 Degmo “Badhan iyo Fiqifuliye”.
8. Gobolka Hayland: waxaa ka dhisan 2 Degmo “Dhahar iyo Xiingalool”.
9. Gobolka Gardafuu: waxaa ka dhisan 2 Degmo “Caluula iyo Baargaal”.

▪ **Shaqaalaha Garsoorka iyo xaruumihiisa :**

Shaqaalaha ka shaqeeya guud ahaan Garsoorka Puntland waxa ay dhan yihiin 234 qof, oo isugu jira: Grasooreyaal, Xeer-Ilaaliyeyaal, Kaaliyeyaal, Gaarsiiyeyaal, Wadeyaal, Adeegeyaal iyo Waardiyeyaal. Sidoo kale wxuu leeyahay xaruumo 7 oo kala ah: Gaalkacayo, Buurtinle, Garoowe, Qardho, Xarfo Badhan iyo Boosaaso, Goobaha kale dhammaantood waxa ay ku jiraan guryo kiro ah taas oo caqabad weyn ku ah Garsoorka.

▪ **Waxqabadka iyo dhacdoovinka sanadkan 2021:**

Guddiga sare ee Garsoorka Puntland (GSG) waxa uu u taagan yahay hormarinta iyo tayaynta Garsoorka sanadihii la soo dhaafay, waxa uuna qabtay sanadkan shaqooyin badan, waxaana shaqooyinkaas ka mid ah:

- Tayeynta Garsoorka iyada oo is beddel lagu sameeyey lana qaatay Garsooreyaal iyo Xeer-Ilaaliyeyaal cusub oo tayo iyo hufnaan leh, ka dib markii ay mareen nidaamka Garsoorka iyo habka shaqaalaynta, sida in uu haysto Garsooruhu shahaado Jaamacadeed oo la aqoonsan yahay ka dibna la mariyo imtixaan.
- Kormeeridda Xarumaha Maxkamadaha qaarkood sida Mudug, Nugaal, Bari, Karkaar, Hayland, Gardafuu, degmada Boocame oo ka tirsan Gobolka Sool, iyada oo ujeedku yahay u kuur gelidda xaaladaha Garsoorku ku sugan yahay.
- Bilaabidda dhismayaasha xurumaha kala ah: Golaha Sare ee Garsoorka, Maxkamadda Sare, Xeer-illaalinta, Maxkamadda Dastuuriga ah iyo Machadka Tababarrada Garsoorka oo laga bilaabay Degmada Garoowe iyo Maxkamadda Degmada Badhan oo ka tirsan Gobolka Sanaag ugu danbeyn bisha Janaayo, sidoo kale dhismaha xarunta Maxkamadda Degmada Boosaaso.
- Bixinta shahaado sharafta Maxkamaddaha Gobollada iyo Degmooyinka ugu shaqada wanaagsan oo la gudoonsiiyey Maxkamada Derajada laad ee Degmada Gaalkacayo iyo Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Mudug.

### Horumarka Maxkamadda Puntland

Jiritaanka Dawladnimo waxaa saldhig u ah dhismo hay'ad Garsoor oo xooggan oo qayb mug leh ka qaadata sugida Amniga, dib u heshiisiinta Bulshada, xal u helidda Khilaafaadka, u hiillinta kuwa dulman ee aan awoodina raadsashada xuquuqdooda iyo hor tagista sharciga.

Haddaba waxa aan warbixin kooban ku soo gudbinaynaa qaabka shaqo ee Garsoorka Jubbaland iyo waxqabadii u hirgalay sanadka 2021.

- **Tababarrida howl-wadeennada Garsoorka Jubbaland:**

Waxa loo qabtay howl wadeennada tababarro ku aaddan qaabka Gudashada waajibaadkooda Mudo Lix jeer ah. Tababarradaas oo ujeeddadoodu aheyd sare u qaadida tayada bahda Garsoorka sida: Garsoorayaasha, Xeer-ilaaliyaasha iyo shaqaalaha kale.

- **Bilaabida dhismeyaal Cusub iyo Dayactirka kuwa hore:**

Waxaa u suurta gashay Maxkamadda Darajada 1aad ee Degmada Kismaayo in loo dayactiro Hoolka qaadista dacwadaha iyo xafiisyada kalaba, Sidaa oo kale waxaa dib u nashqadayn lagu sameeyay xafiisyada Garsoorka qaar kamid ah, sida kan Xeer-ilaaliyaha Guud ee Jubbaland, qaacada shirarka.

- **Horumarinta isticmaalka Hanaanka Electronic-ga ah iyo xafiiska caawinta dadweynaha:**

Waxaa la sameeyay xafiiska caawinta dadweynaha (Help desk information) oo loogu tala galay caawinta dadweynaha iyo hagiddoodaba, si loogu fududeeyo helidda adeeg caddaladeed oo hufan.

### Horumarka Maxkamadda Galmudug

Garsoorka Galmudug waxa uu ku guuleystay sanadka 2021 in uu dhameystiro howl wadeennada Garsoorka oo ka kooban:

1. Hawl galinta 30 Garsoore oo isugu jira heerka 1aad, heerka 2aad, iyo heerka 3aad
2. Qaadashada iyo hawl galinta 22 Kaaliye iyo gaarsiye.
3. Dhismaha Afar Maxkamadood.
4. Baahinta adeegga Garsoorka ee degmooyinka iyo gobollada Galmudug.

**Horumarka Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Galmudug**

Waxaa u hirgalay sanadka 2021-kii arrimaha ay ka mid yihiin:

- **Tobabaridda Howl-wadeennada xafiiska Xeer-Ilaalinta:**

Sanadkaan waxaa tababar la siiyay qaar ka mid ah howlwadeennada Xafiiska, tababarradaas oo sare loogu qaadayey xirfadooda dacwad oogista iyo baarista fal dembiyeedyada, waxaana tababarka ka qeyb qaatay Xeer-ilaaliyaha Guud ee Galmudug iyo ku xigeennada xeer ilaaliyaha guud.

- **Kormeerida Iyo Xog Uruurinta Saldhigyada Booliska:**

Iyada oo laga duulayo qorshe howleedka xafiiska xeer ilaaliyaha guud, waxa uu xafiiska xeer ilaaliyaha guud, kormeer iyo xog uruurin ku tagay saldhigyada booliska iyo xabsiyada Degmooyin iyo magaalooyin ka mid ah Galmudug, si uu ula socdo habsami u socodka howlaha saldhigyada iyo duruufaha ay ku noolyihiin maxaabiistu.

- **Qalabayn Xafiisyada Xeer Ilaalinta:**

Sanadkan waxa uu xafiisku ku guulaystay la qalabeeyo seddex ka mid ah xafiisyada ay ku howl galaan howl wadeennada xafiiska xeer-ilaaliyaha guud.

**Horumarka Maxkamadda Koofur Galbeed**

Garsoorka KGS sanadka 2021 waxaa u qabsoomay shaqooyin kala duwan oo ku aaddan kor u qaadista xirfada shaqaalaha Garsoorka, dib uhabeyn lagu sameeyey hanaanka Garsoorka Koonfur galbeed iyo wadashaqeynta hay'addaha kale ee Dowladda.

bilowgii sanadkaan 27-kii Maarso Maxkamadda Sare ee KGS ayaa tababar ku saabsan habraaca qaadista dacwadaha u furtay 25 kamid ah Garsoorayasha Maxkamadaha KGS Kuwaas oo ka kala yimid Gobolada Baay, Bakool iyo Shabeellada Hoose korna loogu qaadayay xirfadooda shaqo.

2-da bishii May Garsoorka Koonfur Galbeed ayaa kulan arimaha shaqada iyo sidii loo hormarin lahaa la qaatay Madaxweynaha GKGS Mudane Cabdi Casiis Xasan Maxamed (Laftagareen).

14-kii july Guddoomiyaha Maxkamada sare ee KGS ayaa Baydhabo ka furay shir looga hadlayay qabyo qoraalka sharciga dhismaha Guddiga Adeegga Garsoorka KGS.

18-kii July Guddoomiyaha Maxkamada sare ee KGS ayaa booqasho ku tagay xarunta Maxkamada Magaalada Baraawe si loogu kuur galo habsami u socodka shaqo ee guud ahaan Garsoorka KGS.

Sidoo kale 31-kii July Garsoorka Koonfur Galbeed ayaa dood cilmiyeed u qabtay ardayda Jaamacadaha kaas oo looga hadlay fahamka ay ardayda ka haystaan Garsoorka.

21dii Sep 2021-kii ayaa Madaxweynaha Koofur Galbeed u magacaabay Aadan Mukhtar Suuriye u Magacaabey Xeer ilaaliyaha guud ee KGS.

25-kii sep.2021 waxaa Madaxweynaha KGS magacaabay Guddiga Adeegga Garsoorka KG oo ka kooban 7 xubnood.

2dii Dec Guddiga Adeega Garsoorka KGS ayaa Magacaabis iyo isku shaandheyn uu ku sameeyey Garsoorka Gobolka Baay. Sidoo kale 8dii Dec. qaar kamid ah xubnaha Garsoorka KGS ayaa aallada fogaan aragga kaga qeyb galay tababar kor loogu qaadayey tayada Garsoorka KGS, tababar kaas oo ku saabsanaa Dambiyada culus, Xaquuqul-insaanka iyo xariga sharci darada ah.

### Wax-Qabadka Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud Ee Qaranka

Sanadkaan 2021<sup>kii</sup> waxyaabihi u qabsomay xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka ku guulaystay waxaa kamid

1. Qaadashada 20 Xeer Ilaaliye cusub kuwaasi oo ka howl geli doono xafiiska iyadoo qeyb ka noqon doona kuxigeenada XIGQ, kuwaas oo isugu jira 14 Rag ah iyo 6 Dumar ah.
2. Waxaa uu tababarro kala duwan u qabtay qaybaha kala duwan ee shaqaalaha xafiiska si kor loogu qaado xirfadooda shaqo, sida ku xigeennada xeer ilaaliyaha iyo kaaliyayaasha xafiiska
3. Inuu dar dar galiyey la dagaallanka shabakadaha ka shaqeeya tahriibinta dhalinyarada iyo caruurta, ka ganacsiga maadooyinka laga sameeyo walxaha qarxa, sida kiimikooyinka lagu bacrimiyo carrada beeraha kuwaaso oo la ogaaday in ay ka qayb ka qaataan la falgalka qaraxyada, la dagaallanka musuqmaasuqa iyo dhaqida lacagaha sharci darada ah, iyo ugu danbayntii la dagaallanka wasakhaynta bii'ada: barriga iyo baddaba, iyada oo xafiiska Xeer ilaalintu ka hawl galay diyaarinta eedda labo Markab oo wasakh ku shubayay badda Soomaaliya iyo kuwo kale oo kaluumaysi sharci daro ah ka fulinayey gudaha biyaha badda soomaaliya.
4. Wuxuu Xafiiska dib u habeyn ku sameeyey qaab dhismeedka xafiiska, wuxuuna abuuray Waaxyo cusub oo kala ah: Waaxda Dembiyada Badda (Maritime Crimes Unit) Waaxda Maktabadda & Cilmi Baarista Sharciga iyo Waaxda Isgaarsiinta & Xiriiika Dadweynaha

**-DHAMAAD-**